# ISTICMAALKA GOOBAHA MADADAALASHADA EE BULSHADA LAGA TIRADA BADAN YAHAY

*La soo xiriir:*

*Raintry Salk, PhD, Cilmi Baare Sare (Senior Parks Researcher)*

**Raintry.Salk@metc.state.mn.us**; *(651) 602-1669*

*www.metrocouncil.org/parks.aspx*

METROPOLITAN COUNCIL

Nidaamka Goobaha Madadaalashada ee Magaalooyinka Mataanaha ah ee 7da degmo waxa uu isugu jiraa in ku dhow 55,000 oo hektar oo loo qoondeeyey goobo lagu madadaasho wadooyinka dhex maraana gaarayaan ilaa 300 meyl.

Goobaha Lagu Madadaasho waxaa sanad kasta ay soo jiitaan oo booqda dad ka badan 4.5 Milyan. Hase yeeshee, daraasad ay sameeyeen Metropolitan Council ee isticmaalka goobaha heer gobol ee lagu madadaasho waxa ay muujiyeen in bulshooyinka kala duwan ee gobolka aanay ka wada qeyb qaadan, gaar ahaan bulshada laga tiro badan yahay.

Shaqaalaha Metropolitan Council ayaa sameeyey daraasad cilmiyeed si loo ogaado waxyaabaha ka hortaagan in bulshada laga tiro badan yahay soo booqdaan goobaha lagu madadaasho ee heer gobol. Daraasadda waxaa loogu talo galay in lagu ogaado: a) waxyaabaha ay jecel yihiin in ay dibadda ku sameeyaan ayna jecel yihiin, b) waxyaabaha caqabadda ku ah ee ka hortaagan isticmaalka goobahaas, c) waxyaabaha dareenka ka qabaan ee goobaha lagu madadaasho ee heer gobol D) talo soo jeedin ama ra'yi dhiibasho lagu kordhinayo booqashada goobaha lagu madadaasho.

Shaqaalaha Metropolitan Council waxa ay la kaashadeen qaar ka tirsan hay'adaha bulshada iyo kuwa dadweynaha si ay u abaabulaan kooxo ka qeyb qaata ee degaanka magaalooyinka. Maamulku waxa uu qabtay kulan ilaa ay isugu yimaadeen ilaa 16 kooxood. Dad dhan 263 qof ayaa ka qeyb qaatay kulamadaas. Dadka ka qeyb qaatay waxa ay ka soo kala jeedeen qowmiyado iyo dad kala dhaqan duwan. Waxayna ku hadalayeen ilaa 53 af oo kala duwan.

**Ka Qeyb galka Daraasadda ee kooxaha kala qowmiiyadda/jinsiyadda duwan**

| Qowmiyadda/halka qofku ka soo jeedo: | Tirada | Boqolkiiba |
|---|---|---|
| Ka soo haajiray Afrika | 76 | 29,6 |
| Ka soo haajiray Eeshiya ama Eeshiyaan Ameerikaan | 74 | 28,8 |
| Hisbaanik/Laatiino/Laatiina | 66 | 25,7 |
| afrikaan Ameerikaan | 28 | 10,9 |
| Caddaan | 11 | 4,3 |
| Qowmiyado isku dhaf ah | 1 | 0,4 |
| Dadka dhulka loogu yimid | 1 | 0,4 |
| **Wadar** | **257** | **100.1*** |

* Lama mid aha 100.0 oo ay ugu wacan tahay wareejinta tirada.

**Ka qeyb galka kulmada ku wajahan jinsiga qofka**

| | Tirada | Boqolkiiba |
|---|---|---|
| Dhedig | 191 | 74,6 |
| Lab | 65 | 25,4 |

## *Waxyaabaha Ay Jeclaan Lahaayeen Ee Dibadda Lagu Sameeyo*

Waxyaabaha ay dadku aad u hadal hayeen waxaa ka mid ah meelo lagu socdo, goobo dibadda lagu cunteeyo/hilibka lagu sosho. Waxa ay dadku ugu jeclaayeen waxa ay aheyd goob caruurtu ku ciyaaraan. Goobaha lagu dabaasho iyo harada oo la tago waqtina lagula qaato saaxiibada waxa ay ka mid aheyd shanta waxyaabood oo bulshadu aad u jeclaan lahaayeen.

Faraqa u dhaxeeya kooxaha kala duwan ee ka qeyb qaadanaya kulamada waxa ay isaga mid yihiin waxyaabaha u ah baahidooda koowaad ee waxyaabaha dibadda lagu sameeyo.

- Kooxaha ka soo jeeda dadka soo haajiray Eeshiya/Ammerikaanka eeshiyaanka ah waxa ay sadexda shay ee ay ugu jecel yihiin ku tilmaameen socodka, kaluumeysiga iyo nasashada.
- Kooxaha ka soo jeeda Afrika waxa ay ku celceliyeen meelo ay caruurta ku ciyaaraan, iyo meel qoysasku ku socdaan.
- Kooxaha ka oo jeeda Isbaanishka waxa ay codsadeen meelo ay ku dabaaldegaan xafladahana ku dhigtaan, iyaga oo intaas raaciyey meelo cuntada lagu karsado/hilibkana lagu sosho
- Kooxaha ka soo jeeda Afrikan Ameerikaanka waxa ay baahidooda ku muujiyeen goobo dibadda lagu cunteeyo/hilibka lagu sosho.iyaga oo raaciyey meelo bushkuleetiyada lagu wato ama lagu ciyaaro kubadda kolayga.
- Goobo lagu socdo, ilmuhu ku ciyaaraan, lagu dabaasho, ama harada la tago ayaa ahaa waxyaabaha ugu muhiimsan ee ay wadaagaan kooxaha kala duwan ee ka qeyb qaatay kulmada loo qabtay.

Kooxaha ka qeyb qaatay kulamada waxa ay mararka qaar tiradoodu ka yareyd shan qof ama u dhaxeysay 15 ilaa 20 qof.

## *Fikradda "Goobaha Madadaalashada"*

Kooxaha ka qeyb qaadanaya kulmada waxaa la weydiiyey waxa fikradooda ku soo dhaca marka ay maqlaan ereyga "Goobaha Madadaalashada. Aragtida ugu badan waxa ay aheyd dabeecadda.

## *Booqashada Goobaha Lagu Madadaasho Ee Heer Gobol*

Kala bar dadka la weydiiyey waxa ay muujiyeen in ay horey u soo booqdeen goobaha lagu madadaasho ee heer gobol.

## *Caqabadaha Hortaagan Booqashada Goobaha Lagu Madadaasho Ee Heer Gobol*

### Kooxaha ka qeyb qaatay waxa ay u arkayeen in ay caqabad ku yihiin booqashada goobaha lagu madadaasho ee heer gobol waa:

| | |
|---|---|
| 1 | Wacyi gelin la'aan |
| 2 | Waqtiga |
| 3 | Cabsi/arrimo la xiriira xagga amaanka |
| 4 | Gaadiidka oo aan tagin |
| 5 | Dhibaato xaga luqadda ah |
| 6 | Jawiga |
| 7 | Qiimaha |
| 8 | Dhibaato la xiriirta akhrinta khariidada |
| 9 | Wehel la'aan |

| | |
|---|---|
| 10 | Tixgelin la'aan dhaqanka iyo diinta/Heyb sooc |
| | Doonis la'aan* |

* Arrimo isku xiriirsan.

**Wacyi gelin la'aan** Wacyi gelin la'aan, ayaa tan ugu balaaran

*“Waxa aan u maleynayaa in wax weyn tahay in ay ka muuqdaan. haddii aan si daacad ah u hadlo waxa aan u jeedaa in dad badani anaay ogsooneyn goobaha lagu madadaasho ee heer gobol ama ay og yihiin in ay tahay goob la booqan karo ama waxa ay u taagan tahay" (Qof dumar ah oo ka tirsan kooxda ka qeyb qaadaneysay ee Afrikaan Amerikaanka ah).*

## *Waxyaabaha Dareenka Ah Ee La Xiriira Goobaha Lagu Madadaasho Ee Heer Gobol Iyo Dhismayaashiisa*

Kooxaha ka qeyb qaadanayey waxaa la weydiiyey in ay soo bandhigeen waxyaabaha ay dareenka ka qabaan ee goobaha lagu madadaasho ee heer gobol, haddii ay jiraan. Nabadgelyada ayaa shan jeer tiro ka badan lagu celceliyey marka la barbardhigo waxyaabaha kale ee ay ka hadleen.

## *Talo Soo Jeedinta La Xiriirta Xoojinta Booqashada Goobaha Lagu Madadaasho Ee Heer Gobol*

### Talo Soo Jeedinta Kooxaha Kala Duwan Ee Xoojinta Ka Qey Qaadashada Booqashada Goobaha Lagu Madadaasho Ee Heer Gobol

| | |
|---|---|
| 1 | Kordhinta wacyi gelinta |
| 2 | Wax ka qabashada amaanka |
| 3 | Xoojinta goobaha la isugu yimaado "' |
| | Abuuritaanka barnaamij ka wakiil noqosho" |
| 4 | Kordhinta iyo isku dhafka barnaaijyada |
| 5 | Xafladaha oo la kordhiyo |

* Arrimo isku xiriirsan.

*"Waxa ay ila tahay in dadka intooda badan, haddii aanay dhaqankooda ka mid aheyn—haddii aadan ku soo korin meel qoysasku soo booqdaan goobaha lagu madadaasho, adiga iyo caruurtaada midna kuma fikirayo in caruurta geeyaan ama tagana goobaha lagu madadaasho, si gaar ah haddii aanay fahamsaneyn sababta ay u tagayaan halkaas.* Waligay halkaas ma aanan tagin, qoyskeygu ma tago, maxaan ka sameynayaan marka aan tago halkaas, waad garan kartaa" (sidaas waxaa tiri qof dumar ah oo Afrikaan Ameerikaan ah oo ka tirsan dadka ka qeyb qaadanayey).

Talo soo jeedinta labaad ee aad loo soo hadal qaaday waxa ay aheyd wax ka qabashada amaanka si loo xoojiyo booqashada goobahan.

*"Amaanka waa kan ugu muhiimsan. Haddii aynaan dareemeyn nabadgelyo marka aan joogno goobahan, ma soo booqaneyno. Maalmahan dambe waxaa loo baahan yahay in la adkeeyo amaanka, waxaanan aaminsanahay in degaanku wanaagsan yahay marka aad dareemeyso amaan taas ayaana iga dhigeysa in aan si haboon ugu raaceysto (sidaas waxaa yiri qof rag oo ka soo jeeda Afrikaan Ameerikaanka).*

Talo soo jeedinta sadexaad ee kooxaha ka qeyb qaadanayey ka hadleen waa booqashadda goobaha iyo waxyaabaha laga heli karo. Qaar ka mid ah ka qeyb galayaasha ayaa ka hadlay sida ay u jeclaan lahaayeen in ay noqoto goobaha lagu madadaasho iyaga oo xoogga saaray isu imaatinka qoysas ka kooban jiilalka kala duwan. Qaar ka mid ah ka qeyb galayaasha waxa ay ku taliyeen in laga dhigo goobo isku dhow oo jiilalka kala duwan isugu imaan karaan waqtina kuwada aadan karaan iyada oo ku madadaalanaya. Waxaa intaa dheer in ka qeyb galayaashu xoogga saareen baahida loo qabo goobo lagu marti gelin karo oo isugu imaan karaan dad fara badan. Marka taas la eego, waxa ay ka qeyb galayaashu isku raacsanaayeen baadhida loo qabo goobo ay kulmi karaan dad tiro badan. Talo soo jeedin kale waxa ay aheyd in si loo daboolo baahida dadka faraha badan in la kordhiyo waxyaabaha kale ee lagu madadaasho. Tusaale ahaan, qaar badan oo ka mid ah ka qeyb galayaasha waxa ay muujiyeen in ay daneynayaan waxyaabaha dibadda lagu ciyaaro oo aan laga helin goobaha lagu madadaasho ee heer gobol, oo ay ka mid yihiin kubadda kolayga, cagta, beesboolka iyo teeniska.

Talo soo jeedin kale oo aad loogu badnaa waxa ay aheyd abuuritaanka barnaamijka wakiil ka noqoshada oo u adeegga dadka soo booqanaya goobaha iyo kuwa ka fog.

*"Mar haddii aynaan waayo aragnimo u laheyn, waxaanu u baahanahay qof aqoon u leh" (sidaas waxaa tiri qof dumar oo Eeshiyaan Ameerikaanka ka tirsan).*

Talo soo jeedinta afraad ee loo badnaa si loo xoojinayo dadka soo booqanaya goobaha lagu madadaasho ee heer gobol ee soo jeediyeen ka qeyb galayaasha waa isku xirka barnaamijyada. Barnaaijyo loo sameeyo qoysaska iyo caruurta ayaa kooxuhu xoogga saareen, mar dhif ayey ka qeyb galayaashu soo jeediyeen barnaamijyo ku saleysan degaanka ama barnaamijyo salka ku haya waxbarasho.

Hal ku dhagga ugu dambeeya ee kooxda ee ku saabsanaa xoojinta booqashada goobaha lagu madadaasho ee heer gobol waa ku xirka xafladaha.

### Qodobada Ugu Waaweyn Ee Ay Soo Bandhigeen Kooxda Ka Qeyb Galayaasha Ee Booqashada Goobaha Lagu Madadaasho Ee Heer Gobol

